



## Tallaalka xoojiyaha tallaalka mRNA (Pfizer/BioNTech, Moderna)

Tallaalada mRNA waxay si wanaagsan kaaga illaalisa cudurka covid-19 iyo isbitaal geynta. Si kastaba, dad ahaan 65 sanno jir iyo ka weyn, waxay muujisay in illaaladaan tallaalka ay baabi'i karto waqti kadib. Wixii shaqsiyaadkaan ah, waxaan ku talineynaa tallaalka xoojiyaha oo bilaabanayo 6 bilood tallaalka ugu dambeeyay kadib. Illaa iyo hadda, ma jiraan hoos u dhac illaalada tallaalka ku aadan cudurka daran ayaa laga kormeeray dadka ka hooseeyo da'da 65 sanno jirka. Si kastaba, illaalada ku aadan cudurka fudud ee ku aadan faafinta cudurada fayraska oo waqti kadib ah ee loogu talloagalay dadka oo dhan. Sidaas darteed, waxaan sidoo kale ku talinaa tallaalka xoojiyaha ee loogu talloagalay dadka oo dhan ee laga bilaabo 16 illaa 64 sanno jirka

### Waa maxay ujeedka tallaalka xoojiyaha?

Tallaalka xoojiyaha wuxuu xasuusiyaa difaaca jirka fayraska. Tallaalka illaalada ugu badan waa la keydiyaa oo la kordhiyaa.

### Ku aadan cida loogula taliyay tallaalka xoojiyaha?

Illaalada ugu suurtoogalka ah ee ku aadan cudurka Covid 19 ee daran isbitaal geynta, tallaalka xoojiyaha waa loogu taliyay dhammaan dadka 65 sanno jirka ah iyo ka weyn.

Si gaar ah loogu talloagalay:

- Dadka 75 sanno jirka iyo ka weyn;
- Dadka 65 sanno jirka ah iyo ka weyn ee qabo cudurada raaga ee leh halista sareysa<sup>1</sup> ee cudurka Covid 19 ee daran;
- Dagayaasha iyo helayaasha daryeelka ee guryaha xanaanada, guryaha daryeelka deegaanka, iyo xarumaha daryeelka maalinta ee loogu talloagalay waayeelka.

Tallaalka xoojiyaha waxay ku caawineysaa korodhka illaalada illaalada ku aadan caabuqyada iyo jirooyinka qafiifka ah iyo cawaaqibahooda (tusaale ahaan, saameynada muddada dheer ee Covid-19, lumitaanka shaqada) oo si ku meelgaar ah u yareynayo wareega fayraska ee dadka ka yar 65 sanno jirka. Sidaas darteed, tallaalka xoojiyaha ayaa sidoo kale loogu taliyay dhammaan dadka 16 - 64 sanno jirka. Si gaar ah loogu talloagalay:

- Gaar ahaan dadka nugul ee ka hooseeyo 65 sanno jirka ee qabo cudurada raago oo leh halista ugu sareysa oo cudurkadan ee Covid-19.
- Dagayaasha iyo helayaasha daryeelka ka hooseeyo da'da 65 ee guryaha xanaanada, xarumaha daryeelka deegaanka, iyo xarumaha daryeelka maalinta ee loogu talloagalay waayeelka.
- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka oo taabashada tooska ah ee bukaanka iyo daryeelayaasha dadka halista gaarka ah ku jiro.

Tallaalka xoojiyaha ayaa sidoo kale loogula taliyay dumarka uurka ah laga bilaabo ee uurka iyo dumarka naasnuujinayo.

### Goorma ayuu tallaalka xoojiyaha la bixinayaa?

Tallaalka xoojiyaha waxaa la qaadan karaa 6 bilood ee ugu horeysa kadib markii aad dhameystirato tallaalka aasaaska ee tallaalka mRNA. Tallaalka aasaaska dhameysturan ayaa jirayo kadib

- labo garoojo oo tallaalka mRNA; ama
- Caabuuq la xaqiijiyay oo fayraska koronaha + hal garoojo tallaalka oo tallaalka mRNA ugu yaraan 4 isbuuc qeyb ah (iyada oo aan laga eegin isku xigga).

Haddii caabuqa fayraska koronaha la xaqiijiyay kadib markii la dhameystiro tallaalka koowaad ee tallaalka mRNA, kuwa xigga ayaa quseeyo:

- Haddii caabuqa ku dhaco 6 bilood gudahood oo tallaalka aasaaska, tallaalka xoojiyaha ayaa lagu talliyay lix bilood caabuqaas kadib.
- Haddii uu jiro caabuq ka badan 6 bilood kadib tallaalka aasaaska, ma jiraan tallaalka dheeraad ah oo muhiim ah.

### Tallaalkee iyo garoojadee ayaa loo adeegsadaa tallaalka xoojiyaha?

Asal ahaan, isla tallaalka waa in loo adeegsadaa tallaalka xoojiyaha sida tallaalka aasaaska, haddii ay suurtoogal tahay. Haddii tani aan la heli karin, tallaalka kale ee mRNA ayaa sidoo kale la isticmaali karaa. Haddii tallaalka ka duwan mRNA loo isticmaalay tallaalka aasaaska, xoojiyaha waxaa lagu bixin karaa mid ka mid ah labada tallaalka.

Sida ay la jirto tallaalka aasaaska, dadka ka hooseeyo 30 sanno jirka ayaa loogu talliyay inay qaataan tallaalka xoojiyaha la doorbiday tallaalka Pfizer/BioNTech.

Wixii tallaalka Pfizer/BioNTech, isla garoojada ayaa loo siiyaa xoojiyaha sida aasaaska tallaalka. Wixii tallaalka Moderna, bar ka mid ah garoojada waxaa la siiyaa tallaalka xoojiyaha.

### Halkee ayaan ka heli karaa tallaalkid?

Gobolka ayaa masuul ka ah tallaalka. Ka fiiri websaydka ama Qadka warbixinta ee degmadaada ([www.bag-coronavirus.ch/kantone](http://www.bag-coronavirus.ch/kantone)) si aad u ogaatid meesha aad iska diiwaangelin kartid oo aad tallaalka ka heli kartid. Ama weydiid dhaqtarkaaga, farmashiistahaaga ama farmashigaaga.

Warbixinta hartay waxay la mid tahay tallaalka xoojiyaha sida aasaaska tallaalka oo waxaa laga heli karaa xaanshida xaqiiqda "Warbixinta guud ee tallaalka Covid-19 iyo tallaalka mRNA".

<sup>1</sup> Jadwalka 2, bogga 11 ee tallada tallaalka mRNA: *Qeexitaannada cudurrada ee shakhsiyaadka halista ugu badan leh ee ay sababaan cudurrada daba-dheeraada (afka jarmalka)*

